Qof kasta sida ugu fiican:

U BARASHADA FARANSIISKA QAAB LUQAD LABAAD AH

2022

New Brunswick waxay leedahay dhowr barnaamijyo waxbarasho oo kala duwan oo lagu taageerayo ardayda baranaysa Faransiiska.

	WAQTI INTEE LEEG AYAA LAGU QAATAA BARASHADA LUQADDA FARANSIISKA?	BARNAAMIJKU MA LAGU BIXIYAA DHAMMAAN DUGSIYADA?	MAXAA LAGU BARAA FARANSIISKA?
INGIRIISIGA KOOWAAD Ardaydu waxay ka qaybqaataan barashada Faransiiska Awood-saaridda hore, Awood-saarid iyo Awood-saaridda dambe ee fasaallada 4aad ilaa 10aad. Dhammaan ardaydu waxay kaga qaybqaataan khibradaha barashada luqadda Faransiiska iyo dhaqanka fasallada hore (K-3) 30 daqiiqo toddobaadkii.	K-3: FLORA (Fursadaha Barashada Faransiiska ee Aagagga Miyiga) iyo khibradaha barashada luqadda Faransiiska iyo dhaqanka: 30 daqiiqo toddobaadkii	Waxaa laga heli karaa dugsiyada oo dhan Waxaa laga heli karaa onlayn loogu talogalay adeegsiga madaxa-bannaan ee ardayda/qoysaska halkan: **https://flora.nbed.nb.ca/**	Ardaydu waxay wax ku bartaan qaabab dhijitaal ah oo leh macallin. Waxqabadyada waxaa loogu talogalay inay taageeraan xirfadaha akhriska-qorista iyo xisaabta. Waxaa loo isticmaali karaa in lagu taageero Awood-saaridda hore iyo Awood-saaridda dambe ee Fransiiska.
	Fasalka 4: 9% toddobaadkii **Fasalka 5 :** 60% toddobaadkii simistarka koowaad; 9% toddobaadkiiba simistarka labaad **Fasallada 6-8:** 12% toddobaadkiiba **Fasallada 9-10:** 10% (hal dhibic sannadkiiba) **Fasallada 11-12:** Koorsooyinka xulashada ee ikhtiyaariga ah (oo ay ku jiraan onlaynka)	Haa	Faransiiska waxaa lagu baraa hab ku salaysan akhriska iyo qoraalka. Xisaabta, muusikada iyo waxbarashada jirdhiska waxaa lagu dhigaa Ingiriisi inta lagu gudajiro qaybta faransiiska ee Fasalka 5aad.
DHEXGALKA FARANSIISKA (Gelitaanka fasalka 1aad)	**Fasallada 1-2:** 90% **Fasallada 3-5:** 80% **Fasallada 6-8:** 70% } ee maalinta dugsiga **Fasallada 9-10:** 50% **Fasallada 11-12:** 25% } ee sannad-dugsiyeedka	Barnaamijka waxaa lagi bixiyaa sida ku xusan Qaybta 6.4 ee Siyaasadda 309.	Maaddooyinka badankood (sida sayniska, cilmiga bulshada iyo xisaabta) waxaa lagu dhigaa luqadda faransiiska sida ku xusan siyaasadda 309.
DHEXGALKA FARANSIISKA EE WAQTIGA DAMBE (Gelitaanka Fasalka 6aad) Barta gelitaanka ee dambe ee barnaamijka Dhexgalka Faransiiska	**Fasallada 6-8:** 70% ee sannad-dugsiyeedka **Fasallada 9-10:** 50% **Fasallada 11-12:** 25% } ee sannad-dugsiyeedka	Barnaamijka waxaa lagu bixiyaa sida ku xusan Qaybta 6.4 ee Siyaasadda 309.	maadooyinka badankood (sida sayniska, cilmiga bulshada iyo xisaabta) waxaa lagu dhigaa faransiis sida ku xusan Siyaasadda 309.

New Brunswick Nouveau Brunswick CANADA

Koorsooyinka onlaynka ah ee Dugsiga Sare

Waxaa jira dhowr koorsooyin oo onlayn FSL ah oo ardaydu ka dooran karaan Fasallada 11aad iyo 12aad. Ardayda ku jirta barnaamijka Ingiriisiga Koowaad, Awood-siinta dame ee Faransiiska 110 iyo 120 ayay heli karaan. Ardayda Dhexgalka Faransiiska ama ardayda Awood-saaridda dambe ee Faransiiska, waxaa jira dhowr ikhtiyaar oo FSL ah oo ay ka mid yihiin Waxbarashada Coop, Hordhaca Sayniska Deegaanka, Martigelinta iyo Dalxiiska, Sharciga, iyo Qorista. Markay dhammeeyaan Fasalka 10aad ee PIF, ardayda Ingiriisiga Kowaad ee u arkaan inay ku jiraan heerka dhexe shaqaalaha dugsigu waxay isku dayi karaan koorso kasta oo Faransiis ah.

Su'aalaha Inta Badan La Is Weydiiyo

Ka waran haddii waalidku aysan ku hadli karin Faransiis?

Ma jirto rajo laga qabo in waalidiinta ardayda ku jirta mid kasta oo ka mida ikhtiyaarrada barnaamijka inay ku hadli karaan Faransiis. Dhammaan ikhtiyaarrada barnaamijka waxaa loogu talogalay carruurta afkooda koowaad uusan ahayn Faransiis.

Sideen ku caawin karaa ilmahayga?

Waad u akhrin kartaa ilmahaaga da'da yar. Tani waxay xoojinaysaa xirfadaha akhris-qoris ee ugu horreysa iyo barashada luqadda ee dheeraadka ah. Intaa waxaa sii dheer, waalidku waxay ku caawin karaan iyagoo si joogto ah ula xiriira macallimiinta ilmahooda. Sidoo kale waa u qiimo waalidka inay ku dhiirigeliyaan ilmahooda inay wax akhriyaan waxna ku qoraan labadaba Ingiriisiga iyo Faransiiska iyo inay dhagaystaan muusikada Faransiiska, raadiyaha ama telefishanka.

Ka waran haddii ilmahaygu u baahan yahay taageero?

Faransiiska iyo Ingiriisigu waa Luuqadaha Rasmiga ah ee Kanada iyo New Brunswick. Dhammaan ardayda ku jirta qaybta anglophone waxay leeyihiin fursad ay ku bartaan Faransiiska. Dhammaan barnaamijyadu waxay dabooli karaan baahida ardayda. Waxaa jira siyaabo kala duwan oo lagu taageerayo guusha ardayga ee luqadda labaad ee Faransiiska. Tan waxaa ka mid noqon kara adeegsiga Qorshe Waxbarasho Shakhsiyeed, hagaajinta manhajka, waafajinta, taageerooyinka waxbarasho ee guud iyo sidoo kale dhaqamada fasalka ee adag oo loo wada dhan yahay.

Ilmahaygu ma baran doonaa waxyaabo la mid ah carruurta dhigata fasallada Ingiriisiga?

Manhajku wuxuu raacayaa tilmaamaha Waaxda Waxbarashada iyo Horumarinta Carruurnimada Hore ee NB. Ardaydu waxay ka shaqeeyaan ujeeddooyin isku mid ah oo loogu talogalay maadooyinka oo dhan iyadoon loo eegayn luqadda wax lagu dhigaayo.

Wixii macluumaad dheeraad ah ama si aad u aragto PowerPoint iyo Su'aalaha inta badan la Weydiiyo, booqo:

https://www2.gnb.ca/content/gnb/en/departments/education/k12/content/anglophone_sector/fsle.html

Heerarka Aqoonta Afka

Miisaanka Aqoonta Afka ee New Brunswick/Qaab-dhismeedka guud ee Yurub ee Tixraaca

Dabeecadda iyo dhiirrigelintu waxay gacan ka geystaan guusha lagu gaarayo bartilmaameedyada luuqadeed.

DHEXDHEXAAD ~ B1.1

Ardaygu wuxuu awoodaa inuu ku qanco baahiyaha bulshada ee joogtada ah iyo shuruudaha xaddidan ee dugsiga/goobaha shaqada isagoo adeegsanaya erey-bixin ku filan wada hadal fudud, iyadoo la adeegsanayo qeexitaannada qaarkood.
Ardaygu wuxuu:

- siin karaa macluumaad isla markaana bixin karaa sharraxaad ilaa heer sax ah;
- wax ka qaban karaa xaaladaha bulshada inta badan, oo ay ku jiraan hordhacyada iyo wada sheekaysiga aan caadiga ahayn ee dhacdooyinka ka dhaca dugsiga iyo bulshada;
- U bixin karaa macluumaad taariikh nololeed ah si faahfaahsan;
- tilmaamo ka bixin karaa meel ilaa meel kale; waxaanu bixinayaa
- tilmaamo sax ah oo ku saabsan khibrad shaqsiyeed.

DHEXDHEXAAD DHEERAAD AH~ B1.2

Ardaygu wuu awoodaa inuu qanciyo shuruudaha kala duwan ee maalin kasta, dugsiga, iyo xaaladaha shaqada, badiyaaana wuxuu muujiyaa heer aad u sarreeya oo ku-hadalka iyo sahalanaanta hadalka ah.
Ardaygu wuxuu:

- ka sheekayn karaa mowduucyo la taaban karo oo la xiriira qaybaha gaarka ah ee aqoonta iyo sidoo kale maaddooyinka dadweynaha ee hadda xiisaha leh;
- bilaabi karaa, joogtayn karaa oo joojin karaa wada hadallada fool-ka-foolka ah ee fudud ee ku saabsan mowduucyada la yaqaan ama xiisaha gaarka ah leh;
- isbarbardhigi karaa oo ka dhiiban karaa fikrado wadahadalka.

HEERKA SARE~B2.1

Ardaygu wuxuu awoodaa inuu ugu hadlo luqadda si faseex ah isagoo xakamaynaya naxwaha iyo saxsanaanta qaabdhismeedka iyo eray-bixinta si uu uga qaybqaato qaabka ugu rasmisan, iyo dhammaan wadahadalada aan rasmiga ahayn, ee ku saleysan waxqabadka, bulshada, iyo tacliinta ama shaqada la xiriirta mawduucyada.
Ardaygu wuxuu:

- si faahfaahsan u sharrixi karaa una sheekayn karaa si sax ah;
- ka sheekayn karaa mawduucyo guud iyo fikrado iyo sidoo kale dhacdooyinka;
- taageeri karaa fikradaha iyo odorosyada

Heerka Faransiiska ee ardaydu ku gaadhaan qalinjabinta dugsiga sare way ku kala duwanaan doonaan ardayba ardayga kale, si la mid ah siday waxqabadka ugu kala duwan yihiin meelaha kale.

Fadlan ogsoonow: Tiro kooban oo dugsiyo ah ayaa loo xulan doonaa inay ka qaybqaataan mashruuc lagu horumarinayo barashada luqadda Faransiiska ee dhammaan ardayda. Qaababkani way ka duwanaan doonaan macluumaadka barnaamijka ee buug-yarahan. Waalidiinta/dadka masuulka ka ah ardayda dhigata dugsiyada la xushay ayaa la siin doonaa faahfaahinta barnaamijka.



Miisaanka Aqoonta Afka ee New Brunswick

Qaab-dhismeedka Guud ee Yurub ee Heerka Tixraaca